

## SABABTEE AYAA U CODAYNAYSAA SANADKA 2021?

Ma ogtahay in aad codayn kartid doorashada deegaanka ee Turku, xataa adigoo lahayn dhalashada/jinsiyada Finishka? Haddii aad maalinta doorashada buuxisid 18 jir, ama ka diwaan gashantahay Turku iyo sidoo kale ka aad tahay:

1. Dhallashadooda haysatid wadan ka mida EU, Norway, Iceland **AMA**
2. Haddii aad adigu haysatid dhalasho wada kale oo aad Finlandna degentahay ugu yaraan laba sano.

Doorashada golaha deegaanku waa muhiim. Magaalada Turku ayaa masuul ka ah arrimo badan, kuwas oo ina khuseeya, tusaale ahaan waxaa ka mid ah, adeega caafimaadka, iskuullada, xanaanooyinka caruurta lagu hayo, adeega gaadiidka sida basaaska, jidadka, maktabadaha, jardiinooyinka iyo kuwo kale oo badan.

Golaha deegaanka ayaa go'aamiya muuqaalka iyo dareenka magaalada Turku. Waxaa kale oo ay gaadhaan go'aamo waaweyn. Tusaale ahaa go'aamadaas waxaa ka mida ah.

- Goobta laga dhisaayo iskuul cusub?
- Daryeelka caafimaadka ma bilaa la'cag baa laga dhigi karaa?
- Cashuur intee leeg ayaa la qaadaa karaa?
- Sidee loo wanaajiyaa adeega gaadiidka dadweynaha "Basaska"?
- .... iyo Go'aamo waaweyn oo kale oo badan.

Golaha deegaanka waxaa si dumiqiraadiyad ah loo doortaa afartii sanoba mar. Doorashadan golaha deegaanka waxaa iminka dhacaysaa 13.6.2021.

Hadii aad codayn karti, ood tahay cod bixiye, bil ka hor doorashada waa in ay boosta kuugu timaado warqada lagu codeeyo (äänioikeusilmoitus") Warbixin muhiima oo dheeraada waxaad ka heli kartaa bejkan (lakiin waa ingriisi):

<https://vaalit.fi/en/right-to-vote-and-compilation-of-the-voting-register>

## SABATEE AYAAD UGU CODAYNAYSAA XISBIGA CAGAARKA?

Xisbiga cagaarka (Vihreä Liitto) wakhtigan aynu ku jirno waa xisbiga labaad ee ugu wayn Turku. Waxaanu difaacnaa oo ilaalinaa xuquuqda, deegaanka, hawada, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, furfurnaan iyo in wax waliba oo la go'aaminaayo cadaadaan oo an wax la qarin.

Arimmaha noogu muhiimsan in aanu Turkuu ka qabano waa:

- Waa in ay Magaaladu cimiladeeda ilaalino, taasna waxaanu ku badbaadin karnaa in la caawiyo gaadiidka sida baaskiilada, bushlikeetiyada iyo sidii u fududaan lahayd lugaynta.
- Ilaalinta qiimaha deegaanka Magaalada. Si qof waliba u helo oo loona fudaydiy, sidii uu u heli lahaa goobta uu degnay yahay, kayn u dhow.
- Sidii ay magaaladu si awood leh qorshaheeda u qorshayso, lakiin waa in ay cagaarna iyo qurixna lahaato.
- Dhamaan waa in loo sinaadaa helida waxbarashada heerka sare. Waa in macalimiin ku filan la shaqaaleysiiyaa sidoo kalena in iskuulada dhaqaalo fiican la geliyo.
- Turkuu waa in ay noqoto magaalo ardayda u wanaagsan.
- Adeega caafimaadka iyo adeega sooshalka waa in qof kastaa heli karo, xataa ajanabiga iyo qaxootiga aan la aqbalin ee aan ogolaansha qaxootinimada haysa ” bilaa waraaqaha ah.
- Magaaladu waa inay caawisaa dadka caawinimada badan u baahan: sida dadka waaweyn, caruurta, dadka xanuunka maskaxda leh, ajanabiga aan weli luuqada fiinshaka si fiican ugu hadal.
- Noloshu wanaagsan waxaa laga helaa Dhaqanka iyo isboortiga, waana in la caawiyo.
- Dhaqaaluhu wuu fiicnaanayaa hadii dadku fiicanyihiin. Waa in dhibaata xal loo helaa oo si deg deg ah loo xaliyo, inta aanay xalinteedu dhibaato iyo qaali noqon.
- Waa in waxa magaaladu qabanays cadaan ahaadaan, si loo ogaado sida cashuurta loo isticmaalo.
- Waa in Magaaladu caawinimo u raadisaa shirkadaha ama shaqsiyaadka iskood u shaqaysta, si shaqo abuur loo sameeyaan.